



Ma garan kartid waqtiga xaalad deg-deg ah dhici karto. 911 Caqliga badan waxey kaa caawini kartaa inaad hore u sii qorsheysato wicitaan.

911 Caqliga badan waa adeeg dalka oo dhan ah oo ay taageerto Waaxda Booliska Seattle iyo Degmada King County, iyo sidoo kale xarumo badan ee wicitaanka xaaladaha deg-degga. Haddii wicitaan ka yimaado lambarkaaga diiwaanka gashan, kuwa teleefanka qabta ee 9-1-1 waxey arkayaan wararka aad ka soo gudbisay quyskaaga iyo gurigaaga. 911 Caqliga badan waa lacag la'aan.

### **Sidee baan Isugu Qori Karaa?**

911 Caqliga badan waxey kuu oggolaaneysaa inaad diiwaan geliso reerkaaga, taasi oo la raacin karo faahfaahin sida taariikhda caafimaadka, luqada la isticmaalo, iyo sawirro.

1. Booqo Smart911.com
2. Sameyso warbixin qofeed oo lacag la'aan ah. Adigey kugu xiran tahay inta warbixin aad soo gudbin karto.
3. Marka aad ka soo wacdo lambar telefoon diiwaan gashan, warbixintaada la hayo waxey ka soo muuqaneysaa xarunta wicitaannada.

[seattle.gov/crime-prevention](http://seattle.gov/crime-prevention)



# Smart911™

Muxuu kale 911ka Caqliga badan sameyn karaa?  
Adeegga Smart911 waa website aamin ah oo lagu sii  
xoojiyey muuqaallo kale:

## Amniga Ganacsiga

Dhismayaasha ganacsiyada ama la deggan yahay, 911-ka Caqliga badan ama Smart911 wuxuu leeyahay mid u dhiganta oo loo habeeyey arrimaha la xiriira ganacsiyada oo loogu yeero Rave Facility. Warar intaa ka badan: [www.seattle.gov/police/need-help/ravefacility](http://www.seattle.gov/police/need-help/ravefacility)

## Ka Hortagga Dhufashada Xooggan

Dhufashada “Swatting” waa facil lagu abuurayo dhacdo wicitaan 911 dhagar ah oo qatar ah si ilaha guud ee xaaladaha deg-degga loogu yeero deegaan qof deggan yahay si loo abuuro dareen cabsi leh. Booliska Seattle waxey arrintani u qaadanayaan si dhab ah. Haddii aad ka wel-welsan tahay inaad dhibane u noqoto isku day dhufasho, waxad isticmaali kartaa Rave Facility qeybteeda Smart911 una soo baaq dareenka “Swatting Concerns” oo kuweena ka jawaaba wicitaannada 9-1-1 loo tabo-baray iney hubiyaan oo tixgeliyaan. Warbixin intaa ka badan: [www.seattle.gov/police/need-help/swatting](http://www.seattle.gov/police/need-help/swatting)

## U soo Dig Seattle

Marka aad isku qorto Smart911, waxad sidoo kale isku qori kartaa ogeysiinnada Alert Seattle. Tani waa u digista Rasmiga ee Magaalada iyo nidaamka ogeysiinta, waadna isku qori kartaa si aad ugu hesho digniino la xeeriyyey farriimo takist ah, iimeel, farriin cod ah iyo baraha bulshada. [alert.seattle.gov](http://alert.seattle.gov)



Waxa jira Warar Badan oo Onleen ah oo ku saabsan dhammaan barnaamijiyadaasi, talooyin ka hortagga dambiyada iyo wax ka badan waxey ku diyaar yihiin:

[seattle.gov/crime-prevention](http://seattle.gov/crime-prevention)